



Waaxda Kastamada Somaliland

Habraaca Xaraashka Kastamada Somaliland

Horumarinta kaabayaasha iyo qalabka dekedda Berbera waxa ay Somaliland siinaysaa fursad ay Berbera ku noqoto dekedda ugu wanaagsan Geeska Afrika, iyada oo samaynaysa fursado uu kor ugu kaco dhaqaalaha Somaliland.

Mid ka mid ah qiyaasaha shaqo wanaagga dekedda kontaynarrada ayaa ah in si degdeg ah loo dejiyo shixnadaha. Dib u dhaca aan loo baahnayn ayaa sababa in ay dekeddu is ku buuxsanto, in kontaynarrada faaruqa ah lagu celin kari waayo maraakiibta iyo in dakhli loo ururin kari waayo dawladda.

Sida rasmiga ah ee ay dekeduhu u shaqeeyaan dunida oo dhan, wakhtiga waxa loo qoondeeyaa si loo hubiyo in alaabta lagula baxo sida ugu wanaagsan. Wakhtiyadaa la qoondeeyay waxa lagu caddeeyaa xeerarka sharci ee kastamada tirsigiisuna yahay 03/2019:

- Xeerka 81: Ku dhawaaqista alaabtu waxa ay qaadanaysaa 45 maalmood gudahood marka ay alaabtu ka timaaddo xagga badda
- Xeerka 82: Waxa waajib ah in la bixiyo ama la dammaanad qaado bixinta lacagta dakhliga laguna bixiyo muddo 10 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka la sameeyo dalab qoran oo uu sameeyo kastanka alaabtu.
- Xeerka 83: Alaabta uu fasaxay kastamku waa in lagala baxaa Meesha ay taallo muddo 10 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka la sameeyo waraaqda lagu fasaxayo in alaabta lala bixi karo.

Waaxka Kastamada ee Somaliland waxa ay shirkadda DP World kala shaqaysay sidii loo aqoonsan lahaa in ka badan 120 Kontaynar oo dekedda Berbera yaallay muddo ka badan intaa loo xaddiday, taas oo keentay ganaaxa dib u dhaca alaabta oo in badan urura, iyada oo alaabtaas qaar ka mid ahi ay dekedda yaalleen in ka badan saddex sannadood.

Guddida Xaraashka oo ay ka mid yihiin Kastamka, Komishanka ilaalinta tayada, booliska cashuuraha iyo wasaaradda ganacsiga iyo dalxiiska ayaa baadhitaan ku sameeyay alaabtaas si ay u caddeeyaan in la xaraashi karo. In ka badan 20 kontaynar ayaa loo aqoonsaday in ay dhibaato ku keenayaan caafimaadka bulshada sidaasna lagu burburiyay.

Marka lagu daro alaabta kontaynarrada ku jirta, 27 baabuur oo la soo dejiyay ayaa loo aqoonsaday in ay dhaafeen muddadii sharciga ahayd ee loogu talagalay.

Dadkii iska lahaa alaabta ayaa lala xidhiidhay lana siiyay fursad ay kula baxaan alaabtooda isla markaana ay ku bixiyaan cashuuraha kastamka, kharashka dekedda iyo qiimaha muddo dhaafka ee ku waajibay. Haddii ay ku fashilmaan in ay alaabtaas la baxaan, waxa ay noqonaysaa in alaabtaasi tahay mid ay si u kas ah uga maarmeen dadkii iska lahaa.

Xeerka Kastamada ee 73/2016 waxa uu awood u siinayaa maamulka Kastamka in ay ka takhalusaan alaabta laga maarmay ama muddo dhaaftay, waxaanay dhaqan-gelinayaan hab-raacyo cusub oo lagu xaraashayo, lagu baabiinayo amaba lagaga takhallusayo alaabtaas, iyada oo la hubinayo in loo raaco

nidaamyo ku dhisan daah-furnaan iyo in si is ku mid ah loola macaamilo dhamaan dadka hawshani la xidhiidho. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka xaraashka waxa laga heli karaa mareegtan; <https://mofd.govsomaliland.org/article/auction-rules> .

Lacagta ka soo xeroota iibinta alaabta waxa loo adeegsanayaa in lagu bixiyo cashuurta iyo kharashaadka lagu leeyahay alaabtaas, waxaana loo kala bixinayaa sidan ay u kala horreeyaan:

- a) Lacag u dhiganta lacagta waajibaadka, cashuuraha iyo kharashaadka ku baxay maamulka xaraashka waxa la siinayaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.
- b) Baaqiga soo hadha waxa loo qaybinayaa maamulka dekedda iyo shirkadaha maraakiibta si ay ugu bixiyaan wixii kharash kaydin iyo dejin ah ee ku waajibay
- c) Haddii ay wax intaas dheeri soo hadhaan, waxa markaa la siin karaa qofkii lahaa alaabtaas.

Marka alaabta ay la baxdo cidda ku guulaysatay, shirkadaha maraakiibtu waxa ay mar kele ka faa'idaya in ay la noqdaan kontaynarrada oo madhan.

Alaabta aan la iibin karin waxa suuragal ah in si kele ay u maareeyaan maamulka kastamku, sida in lagu sadaqaysto ururrada samafalka ama ay isticmaalaan hay'adaha dawladdu.

Marka alaabta liiska alaabta la iibinayo la isla dhameeyo, waxa lagu daabacayaa mareegta Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda iyo Baraha Bulshada ee wasaaradda, Laba ka mid ah wargeysyada dalka ka soo baxa, waxaana alaabta lagu soo bandhigayaa Xarunta guud ee Kastamada iyo Kastamka Berbera.

Waxa muhiim ah in la ogaado, alaabta laga maarmay macnaheedu maaha in ay meesha ka baxayso masuuliyadda ciddii lahayd in ay bixiso kharashka kaydinta, muddo dhaafka iyo dejinta ee la siinayo shirkadaha maraakiibta. Shirkadahaas maraakiibtu waxa ay tallaabo sharci la tiigsan karaan dadkaas si ay u helaan kharashaadka baaqiga ah ka dib marka alaabta laga takhalluso.